



## **Ku Daaweynta Dhabar-Jabiyaha Viruska**

Qore: Bronner Gonçalves

Soo helida la heley daawada ah (Ku Daaweynta Dhabar-Jabiyaha ee Viruska) oo marka la soo gaabiyo loo yaqaano (ART) loona soo gaabiyey (Anti-Retroviral Treatment) ayaa waxaa ey noqotey mid ka mid ah helitaannadii ugu muhiimsanaa ee abid soo mara taariikhda Daawooyinka. ART ayaa noqotey daawada ugu muhiimsan ee lagu daweeeyo cudurada HIV iyo AIDS-ka. Waxaa muhiim ah in la ogaado in ART eysan ahayn daawo dhameystiran oo lagu bogsanaayo ee ey tahay mid yareyneysa dhaqsaha uu ku fido cudurka HIV.

Waxaa jira siyaabo kala duwan oo loo isticmaalo ART ama (Ku Daaweynta Dhabar-Jabiyaha Viruska) si loogu daaweeeyo marxaladaha kala duwan ee ey mareyso hadba nolosha viruska HIV. Daawooyinka guud ee ka hortagga HIV ee ugu waaweyn waxaa ka mid ah : Nucleoside/Nucleotide oo ah Caksi u shaqeeya joojiye ah iyo Non-Nucleoside aan ahayn joojiye caksi u shaqeynaaya, Joojiyeyaasha soo Galida (Protease) oo ah barootiin inziimi ah iyo waliba fal-galistiisa. Nucleosides analogs ayaa ahaa wixii ugu horeeyey oo lagu eego ama lagu baaroba daaweynta noocaan ah ee loo yaqaan ART dabayaaqadii 80-aadkii. Laakiin rajadii laga qabey cilmigaan ayaa si tartiib tartiib ah kor ugu kacdey 90-aadkii dhexdiisa markii ey Dhakhaatiirtu bilaabeen iney isku dar-daraan daawooyinkii hore ayagoo mid mid iyo koox kooxba iskugu habeynaayey, taas oo markii danbe loo bixiyey Isku-Dar ama (Cocktail). Isku-Darkaan ayaa keeney in la helo natiijo ka fiican markii halka daawo oo halka nooc ah la isticmaali jirey, sababtoo ah isbed-bedelka dhaqsaha leh ee uu isku bad-badalo viruska HIV, taas oo ka dhigeysa Viruska HIV mid caqli badan oo eysan kari karin daawooyinka asagoo leh iska caabin uu iska caabin karo daawooyinka. Waxaa hada la fasaxay in ka badan 20 nooc oo ah daawooyin ART ey leeyihiin dad kala duwan iyo shirkado oo lagu daaweyn karo Viruska HIV

Markii laga hadlaayo ku daaweynta dhabar-jabiyaha viruska HIV ama ART ayaa waxaa muhiim ah in daaweynta ka hor qofka lagu baaro sariirta, lagana baaro viruska, laguna tiriyo CD4+, sadexdaas siyaabood ayaa lagu ugaadaa in qofku uu u baahan yahay daawada ART iyo in loo dib dhigi karo. Khatarta AIDS-ka ayaa u dhexeeysa khatarta ey Suntu leedahay iyo waliba iska caabinta virusku, waxaa mararka qaarkood dhib ah in dadka kala duwan ee kala heysta dhaqamada kala duwan kuna kala nool daafaha dunidu ey fahmaan in qof walba oo qaba Viruska HIV uusan u baahneyn daawada, Dhinaca kale ayaa waxaa jira in dadka qeybtood ee qaba cudurkaan ay ka baqaan amaba ka welwelaan isticmaalka ART, ayagoo u maleeya hadii ey bilaabaan qaadashada daawada ART in ey soo dhowatey waqtigii ey u dhiman lahaayeen cudurka AIDS-ka, taas oo ah fikrad khaldan oo ah wax kama jiraan. Qeyb ka mid ah dadka qaba Cudurkaan ayaa sidoo kale u heysta hadii ey bilaabaan qaadashada daawooyinka ART ineysan aadi karin shaqooyinkooda iyo

danohooda gaar-ahaaneed oo ey saacado badan iyo waliba waqti badan u dhaxaynayaan Isbitaalada, Waana fikrad kale oo khaldan waayo runta ayaa waxay tahay in daawada ART ama Ku Daaweynta Dhabar-Jabiya Viruska ey tahay daawo caadi ah oo kaniini ah ayadoo qofku uu waliba kala dareemi karin farqiga u dhexeeya markii hore iyo ka dib markuu daawada ART cunideeda bilaabo.

Goormee ku daaweynta ART la badali karaa ? Waxaa dhacda in 50% dadka xanuunka qaba ey la kulmaan mid ka mid ah : Jiro ka timaada isticmaalka daawada (sida shubanka siyaadada ah, polyneuropathy (xididada oo ku xanuuna) iyo dhiig yari, benkiriyaska oo ku xanuuna, iyo xanuuno kale), ama in uu dheeraado isticmaalka ku daaweynta Dhabar-Jabaiyaha Virusku, ama in qofku ku daawoobi waayo, amaba uu ku sumoodo, taas oo keenta in la joojiyo isticmaalida ART.

Inkastoo helitaanka ku daaweynta ART iyo qaadashada kaniiniyaasheeda ey sahashey sii dheereynta nolosha bukaanno badan oo qaba cudurka HIV/AIDS, ayaa hadana waxaa jirta in helitaanka daawadaas uu dhib ku yahay dad badan oo ku nool wadamada soo koraaya, ayadoo dadka gadan kara ama heli kara daawadaas ey ku yar yihiin wadamadaas, Sida ey sheegtey Hey'ada UNAIDS sanadkii 2006 ayaa waxaa jirey in 39.5 milyan oo qof uu ku dhacay cudurka HIV/AIDS, ayadoo inta badan dadkuu cudurku ku dhacay ey ku nool yihiin wadamada faqriga ah ee dakhliga yar amaba loo yaqaan dowladaha soo koraaya, dadkaas aan soo sheegney in ka mid ah oo yar ayaa awood u leh helitaanka daawada ART, qofka qaba HIV/AIDS wuxuu u baahan yahay inuu qaato daawooyinka ART, hadii uu qofku awood u yeelan waayo in uu helo daawooyinkaas ayaa waxaa yaraata rajada laga qabo in qofkaas noloshiisu sii dheeraato, ayadoo inta badan uu qofkaas mudo yar ka dib u geeriyoodo cudurkaas.